

Ubeddelashada tuubada caloosha

(g-tube) loo badalayo tuubada


mindhiciirka (Gj-tube)

GTube to GJTube Conversion - Somali

EDR138-SO

Waa Maxay Ubeddelashada Tuubada Mindhiciirka (GJ) ?

Ubeddelashada Tuubada midhiciirka (GJ) waa tuubada caloosha (**G-tube**) oo loo bedelo tuubada mindhiciirka (**GJ-tube**). Ilmahaaga wuxuu haysan doonaa tuubo caloosha toos utagta (G-tube) iyo mid caloosha garab marta oo midhiciirka gasha (J-tube).



AMT MiniONE GJ button



Avanos Mickey GJ Button

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Ubeddelashada tuubada caloosha

(g-tube) loo badalayo tuubada

mindhiciirka (Gj-tube)

GTube to GJTube Conversion - Somali

Yaa faa'iidooyin Ka helaya Ubeddelashada GJ?

Bukaanada qalliinka galaya waxaa laga yaabaa in G-tube kooda loo beddelo GJ-tube si loogu caawiyo soo kabashada qalitaanka kadib. G-tube ka bukaanka ayaa sidoo kale laga yaabaa in loo beddelo GJ-tube si loo hagaajiyo udulqaadashada quudinta.

Isu Diyaarinta Ubeddelashada GJ

NPO (lama ogola in wax afka ama g-tube ka laga siiyo) 3 saacadood ka hor qalliinka. Fadlan raac tilmaamaha kale oo gaarka ah oo uu takhtarka ilmahaaga ku siiyo.

Waxa laga Fili karo Ubeddelashada GJ

- G-tube ka waxaa loogu beddelaa GJ-tube waaxda Interventional Radiology. Haddii qalitaan awgii loo sameynayo, sida badan waxaa la sameeyaa todobaad ama wax lamida kahor inta aan qalliinka la samayn.
- Haddii qalliin awgii loogu sameeyo, quudinta waa in lagu sameeyaa iyada oo loo marayo G-Port sidii caadiga ahayd. Haddii loo sameynayo sababo kale awgood, fadlan kala hadal qorshaha quudinta takhtarka dalbay.
- Daryeelka goobta waa in loo sameeyaa sidii caadiga ahayd.
- Ha qaloocin ama Ha wareejin GJ-tube ka maadaama ay tani keeni karto inuu meesha kasoo fuqo "corkscrew effect".
- Tuubada mindhiciirka waa in lagu shubaa tiro yar oo biyo ah, 10 ilaa 20ml, laba jeer maalin kasta. Iisticmaal biyaha diiran ee qasabada oo si tartiib ah u riix si aad uga hortagto casiraad. Ha ku qasbin, haddii aad awoodi waydo in aad ku shubto, jooji oo wac labarka kalkaalisda caafimaadka.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Ubeddelashada tuubada caloosha

(g-tube) loo badalayo tuubada

mindhiciirka (Gj-tube)

GTube to GJTube Conversion - Somali

- Badalista GJ-tube ayaa loo baahan doonaa hadii ay tani tahay ubeddelasho joogto ah oo GJ-tube ah. Waxaa lagu taliyaa in la badalo 4 ilaa 6 bilood kastaba mar ama ka hor hadii loo baahdo. Tani Dhakhtar qalliin ayaa ku sameyn kara qolka qaliinka ama waxa lagu sameyn karaa waaxda Interventional Radiology. Ubeddelashad g-tube ka (caloosha kaliya) waxa lagu sameyn karaa rugta caafimaadka (kiliinigga). Fadlan ballanta u qabso siduu ku faray takhtarka ilmahaada.
- Haddii ay jiraan calaamadaha tuubo guurka, wac lambarka kalkaalisaada caafimaadka, qorshe ayay dajin doonaan. Calaamadaha waxa ka mid ah udulqaadasho la'aan quudinta, dibiro, iyo/ama raaxo la'aan. Gargaarka degdega ah (ER), ama booqasho isbitaal ayaa laga yaabaa in loo baahdo, haddii tuubadu ay dib ugu soo guurtay caloosha.
- Haddii ay tuubada meesheda ka baxdo wac lambarka kalkaalisaada caafimaadka ama takktarka cunugaada si aad u hesho tallaabooyinka xiga.

Waxa la fili karo haddii ubeddelashada GJ-ga loo sameeyay qalliin

Quudinta qalliinka kadib waxaa laga siin doonaa tuubada mindhiciirka (J port), taas oo u ogolaaneyso quudinta si dhakhso leh in dib loogu bilaabo waxayna ka hortageysaa in wax caloosha ku jiro kusoo gaddoomaan . Quudinta waa la horumarin doonaa inta cunugaadu joogo isbitaalka iyadoo la hiigsanayo in dib loogu beddelo quudinta tubbada caloosha G-tube, sidii caadiga ahayd. GJ-tube ka waxaa dib loogu badali doonaa G-tube marka tan la sameeyo. Mararka qaar, bukaannada waxaa guriga loogu diraa iyagoo wata tuubada GJ, haddii loo baahdo, si ay ugu soo noqdaan quudintoodii caadiga ahayd. Tilmaamaha waxaa lagu siin doonaa wakhtiga bixinta, iyadoo qorshaha ballamaha lasocodka laguu dajiyey.

Haddii ay jiraan calaamadaha tuubo guurka, wac lambarka kalkaalisaada caafimaadka, qorshe ayay dajin doonaan. Calaamadaha waxa ka mid ah udulqaadasho la'aan quudinta, dibiro, iyo/ama raaxo la'aan. Gargaarka degdega ah (ER) ama booqasho isbitaal ayaa laga yaabaa in loo baahdo, haddii tuubadu ay dib

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.

Ubeddelashada tuubada caloosha

(g-tube) loo badalayo tuubada

mindhiciirka (Gj-tube)

GTube to GJTube Conversion - Somali

ugu soo guurtay caloosha si ay u sameeyaan sawirid ama raajo oo loo hubiyo halka tuubadu ku jirto.

Takhaatiirteena halkan ayay kuu joogaan markasta, marnaba haka waaban inaad nala soo xiriirto.

Meesha aad kala xiriiri karto:

- Telehealth 651-229-3890
- Ballan sameyska Midwest Interventional Radiology (Waxay ku taallaa Isbitaalka Regions' Hospital) 651-917-9330
- Ballan sameyska U of M Interventional Radiology 612-273-6378
- Children's Interventional Radiology 612-874-5399

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers. If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.